

# WELLSTONE

## Fahmidda Sida aan ku Magacowno Nidaamka North Star Accountability System

### Every Student Succeeds Act (ESSA)

Sharciga **Every Student Succeeds Act (ESSA)** Waa markii u danbeysay ee dib loogu ogolaaday dugsiyada hoose iyo dugsiyada sare, sharcigaan oo lagu badalay sharcigii hore ee loo yaqaanay No Child Left Behind (NCLB). Madaxweynihii hore Barack Obama ayaa ansaxiyey oo saxiixay sanadkii 2015 in uu noqdo mid sharci ah sharciga ESSA. Iyo in dib loo cusbooneysiyo sanad walba, sharciga waxaa ku dagan sharuudaha laga rabo in ay sameeyaan gobolada raba in ay helaan maalgalinada waxbarashada federaalka. Inkasta oo uu xeerka ESSA ay ka mid yihiin sharuudaha ku saleysan heerarka imtixaanaadka sanadlaha ee lagu cabiro aqoonta ardayga, una helaan cadalad, iyo waxbarasho tayo sare leh. wasaarada waxbarashada Minnesota nidaam la xisaabtanta cusub ayey aassaastay. Iyada oo hoos Imaanayaan ESSA, MDE waxay abuurtay Nidaamka la xisaabtanka cusub **North Star Excellence and Equity System** si loo hubiyoin ay dugsiyada dhammaantood u ugu shaqeeyaan ardayda si wanaagsan oo cadaalad ah.

### North Star Excellence and Equity System

Himilada nidaamkaan cusub waa in lagu hubiyo in ay dugsiyadu daboolaan baahida arday kasta oo ay u adeegaan dhammaan ardayda oo dhan. Nidaamkaan dugsiyada qaarkood ayaa lagu aqoonsanayaa in la taagero lana hagaajiyo, sababtoo ah waxay sameynkaraan in ay isticmaalaan sidii ayku yareen lahaayeen farqiga waxbarashada u dhaaysa ardayda. Dugsiga loo aqoonsan doono taageerada iyo horumarinta marka ugu horeysa sanad dugsiyeedkaan, waxaa loo sii wadayaa taageeradaas sadex sano.

### Dugsiyadeena waxaa loo Aqoonsaday

Marka loo eego nidaamka North Star accountability system, dugsiyeena waxaa loo aqoonsaday: Taageero Lala Beegsanayo horumarinta.

Waxaa loogu aqoonsaday heerkaan taageerada iyo horumarinta sababaha soo socda Marka laysku Cel-celiyo dhammaan xogta ardayda laga aruuriyay ee laga helay dugsiyadeena taas oo ku saabsan tallaabooyinka la xisaabtanka gobolka, waxaa la ogaaday in uu dugsigaani ku jiro dugsiyada ay waxbarashadoodu ka hooseyso boqolkiiba 5% dugsiyada hela maalgalinta barnaamijka Title I.

Tirada cel-celiska heerka qalin jabinta afartii sano 2015,2016,2017 ayaa ka hoosaysay boqolkiiba 67% marka loo eego kooxaha ardayda soo socda:

- Dhammaan Ardayda oo dhan
- Black Students
- Hispanic Students
- English Learner Students
- Ardayda u qalma cuntada bilaashka ah ama mida qiimaha jaban

### Support & Improvement Process

Dugsiyada loo aqoonsaday taageerada iyo horumarinta North Star waxay u baahan yihiin in ay ku wargaliyaan qoysaska kadibna howlgaliyaan qoysaska iyo daneeyayaasha bulshada dugsiga:

- In la dhameystiro qiimeyn dhameystiran oo eegaya sababta dugsiyada loo aqoonsaday
- Abuurida qorshe horumarineed oo wax ka qabanaya sababaha aassaasiga dib u dhaca ardayga, guusha iyo farqiga u dhaxeeya waxbarashada
- Hirgalinta iyo kormeerida qorshaha horumarinta marka ay dhaqan galinayo

### Ka qeyb-Galinta Qoysaska & Bulshada

Waxaan u baahanahay shaqaalahayaga, qoysaska, iyo xubnaha bulshada ku liug yeeshaan qiimeeynta baahida iyo qorshaha iyo qorshaha hagaajinta. Waxaan kugu martiqaadaynaa in aad ka qeybqaadataan, inaga oo ka shaqeynayna in dhamaan ardayda ku guuleystaan guusha waxbarashada dugsiga, hadii aad jeceshahay inaad ka qeybqaadato, fadlan na soo wac qadkeena taleefanka 668-5115.